



Warbixinno ku saabsan Baaritaankaaga Caafimaadka



Dhamaan Dumarka iyo Ragga dalbadayaasha Asaylamka, waxaa la marinayaan baaritaan dhakhtar ee xagga caafimaadka, si haddii ay jirtana xanuuno la is qaadsiin karo loo ogaado, oo haddii ay suurowdana la daweyyo.

Baaritaankaasuna waa mid sida uu sharcigu qabo waajib ah (§ 62 ee sharciga Asaylamka) oo sidoo kalena lacag la'aan ah.

Haddiibaaritaankaas uu sida uu qabo qodobka § 62 ee sharciga Asaylamka ay qof

Dhedig ah ama qof Lab ahna diidmo ka timaado, waxaa hay'adda qaabilsan

degenaashada ay baaritaanka ku marsiin kartaa iyada oo awood isticmaalaysa.

Arrintaas baaritaanka gudaheeda ah, waa la diinwaangalinaya xogtaas Caafimaadka (Natijada laga helay Sambabka-, Dhiigga iyo sidoo kaleba natijada laga helay baaritaanka Saxarada).

Xogtaasna waa loo baahan yahay, si sida ugu dhakhsaha badan loo ogaado xanuunada la isku gudbin karo oo isla markaasna haddii ay suurogal tahay loo daweyyo, si dadka kale looga ilaaliyo in lagu daarto.

Jawaabta baaritaanka waxaa loo gudbinayaay hay'adda qaabilsan deegaan dejinta. Haddii ay dhacdo in laga helana xanuu faafa, waa lagula socodsiiyaa, haddii ay suurowdana waa lagaa dawaynayaay.

Sidoo kalena waxaa lala socodsiiyaa hay'adda Caafimaadka dawlada u qaabilsan ee meesha aad degena tahayn, sida uu qabaan qodobada (§ 62 ee sharciga Asaylamka iyo §§ 25, 28 ee sharciga xanuunadad faafa). Sidoo kale waxa aad arki kartaa natijada, waxaadna dalban kartaa koobi.

Baaritaanka Sambabka (Raajo ama X-Ray)

(Laga bilaabo qofka ay u buuxsanto 15 Sano, oo qabo cudur la is qaadsiin karo ee Sambabka).

- ▶ Qaaxadu waa la is qaadsiin karo, oo waxa ay ku dhaca Sambabka, oo haddii aan la dawaynna, Sambabka oo dhan baabi'in kara, oo dhimashana keeni karta. Xanuunkaasna waxa uu sida badan ku bilowdaa iyada oo aysan jirin dareen xanuuneed, dabadeedna waxaa bilowda Qufac, Miisaan dhac iyo Dhidid badan. Qaaxada ku dhacda Sambabka waxaa laga ogaan karaa Sawirka Raajada, dabadeedna waxaa lagu dawayn karaa dawooyin. Qaaxada aan la ogaanna, waxa ay u gudbi kartaa qaybo kale oo jirka ka mid ah, ayna si waarta ahna ay u baabi'in kartaa. Sidaasi darteedna in hore loo ogaado, oo laguugu baaro Raajana waa muhiim.
- ▶ Carruurta iyo dumarka uurka lehna waxaa intii lagu baari lahaa Baaritaanka Raajada ah, laga qaadi karaa Dhiigga (IGRA- Test)

Baaritaanka Dhiiga

(Cudurada la iskugudbin karo ee ku jira Dhiiga ama mar marba Sambabkaba)

- ▶ Hepatitis B: Waa xanuun la isku daaran karo, oo Viirus wasakhaysan ah, kaasoo la isugu gudbin karo dhiig ahaan ama Galmadaba. Waxa ay u keentaa Infekshan Beerka ah.
- ▶ HIV 1 iyo 2: Waa xanuun infekshan ah, oo laga isaga gudbin karo Dhiiga iyo Galmada. Waxa ay keentaa cudurka AIDS – ka, kaasoo haddii aan la dawayn dhimasho keeni karta.

Dhacdooyin la xariirta Baaritaanka Saxarada

(Waxa iman karta kala qaadista Calool xanuunka), tusaalena ahaan Shubanka ama dareen Xanuun ku yimid dad aad kulan la yeelatay.

- ▶ TPE-Ruhr-Gruppe: Baaritaanka dhinaca Baakteeriyyada, Shubankana keeni karta.
- ▶ Bahalada gala caloosha (Tusaale ahaan Gooryaanka).



Talaalka

Talaalku waxa uu ka mid yahay waxyaalaha ugu wanaagsan Caafimaadka ee dhinaca ka hortagga. Wuxuu difaacaas cudurada jeermiska ah ee la isku daaran karo.

- ▶ Si aad adiga iyo Qoyskaaba aad u isku talaashaan, si aad uga hortagi kartaan cudurada la isku daaro, sida Jadeecada oo kale, la xariir fadlan xarumaha Caafimaadka ee meesha aad degan tahay ama Dhakhtar leh Xarun Dhakhtareed. Talaalka waxaa laguugu ogol yahay lacag la'aan.

Warbixinno ku saabsan Baaritaankaaga Caafimaadka



Warbixinno ku saabsan Baaritaankaaga Caafimmaadka

Baaritaanka Sambabka (Raajo ama X-Ray)

Sawirkha Raajaynta ama X-Ray

Laga bilaabo kolka ay buuksanto 15 Sano

(Caruurta iyo Dumarka Uurka leh, Baaritaanka Dhiigga)



Baaritaanka Dhiigga

Laga bilaabo marka ay buuksanto 15 Sano: Hepatitis B, HIV 1 iyo 2

Caruurta iyo dumarka Uurka lehna: Baaritaan Qaaxada ama TB



Dhacdooyin la xariirta Baaritaanka Saxarada

Dhacdooyin keeni kara bakteeriyada xiidmaha iyo

Mindhicir ku noolaadaha, Tusaale ahaan Shubanka



Talaalka:

Talaal lacag la'aan ah oo loo jeedinayo dhamaan Dhediga iyo Labka Asaylam doonka ah

IMPRESSUM

Waxaa soo saaray: Bayerisches Staatsministerium für Gesundheit und Pflege
Haidenauplatz 1, 81667 München
www.stmpg.bayern.de

La soo saaray: November 2015
Tirada Mawduuca: stmpg_asyl_011

Habeynta: CMS – Cross Media Solutions GmbH, Würzburg
Caddaynta Masavirada:
fotolia.com: Alexandra Gl; annzakharchenko
Daabacadda: Druckerei Schmerbeck GmbH, Tiefenbach